

Early Achievers Timeline Requirements

Sideen U Buuxin Karaa Hadafyadeyda Jadwalka ee Early Achievers?

Dukumeentigani waa dulmar ku saabsan shuruudaha wakhtiga ee bixiyayaasha hela lacagaha kaalmada iyo/ama kuwa bixiya adeegyada Waxbarashada Caruurnimada Hore iyo Barnaamijka Kaalmada (Early Childhood Education and Assistance Program, ECEAP) iyo sida loogu buuxiyo nidaamkeena dib loo eegay. Wixii faahfaahin ama su'aalo dheeraad ah, farriin u dir iimaylka QRIS ee qris@dcyf.wa.gov.

Ma ogtahay in aanu dhawaan horumarinay MERIT? Hadda waxaa Hadafyadaada Early Achievers ka eegi kartaa koontadaada **MERIT!** Waxaad ka heli kartaa macluumaadka jadwalka iyo hadafka meesha hoose ee bogga Facility/Site (Xarunta/Goobta), ee qaybta Early Achievers. Halkaas waxaad ka helaysaa jadwal lagu magacaabo "My Timeline" (Jadwalkayga). Jadwalkani wuxuu muujinayaa nooca jadwalkaaga (Kaalmada Cusub, Kaalmada Jirta, ECEAP), heerka aad gaartay, iyo talaabooyinkaaga xiga. Waxaa kale oo ay muujinaysaa soo koobida hadafyada aad hore u buuxisay.

Shuruudaha Hadafka

Shuruudaha Hadafka 1: Isku diwaangeli Early Achievers 30 Maalmood Gudahooda markaad hesho Lacag-bixinta Kaalmada Bilowga ah ama Bixinta Adeegyada ECEAP.

Maxaa dhacaya haddii uu isegno hadafkan? Haddii 30 maalmood ka dib markii aad heshay lacag-bixintaada kabka bilowga ah ama bilawga adeegyada ECEAP aadan iska diiwaan gelin Early Achievers, waxaad isla markiiba noqon doontaa mid aan u qalmin inaad hesho maalgalinta gobolka (sida kaalmada ama ECEAP) illaa aad ka dhamaystirto diiwaangelinta Early Achievers. DCYF waxaa looga baahan yahay inay ogeysiiso qoysaska haddii bixiyehoodu halis ugu jiro inuu waayo hadaf. Haddii aadan iska diiwaan gelin Early Achievers **10** maalmood gudahooda markaad hesho lacag-bixintaada kaalmada ee koowaad, DCYF waxay waraaqo u diraysaa waalidiinta diiwaangashan ee qaata kaalmada si ay ugu wargaliyaan inaad halis ugu jirto inaad lumiso u qalmitaanka. Haddii aad seegto hadafkan, waxaad dib u heli kartaa u qalmitaankaaga si aad u aqbasho kaalmada oo aad u hoggaansanto heshiiskaaga ECEAP adiga oo dhammaystiraya Diiwaangelinta Early Achievers.

Shuruudaha Hadafka 2: Buuxi Codsiga Early Achievers ee Aqoonsiga Tayada 12 Bilood gudahooda laga bilaabo Diiwaangelinta Early Achievers.

Maxaa dhacaya haddii uu isegno hadafkan? Haddii aadan ku dhammaystirin Codsiga Early Achievers ee Aqoonsiga Tayada gudaha MERIT 12 bilood gudahood laga bilaabo isdiiwaangelinta, waxaad noqon doontaa mid aan xaq u lahayn inaad hesho maalgalinta gobolka (sida kaalmada ama ECEAP) illaa aad ka buuxinaysa Codsiga Early Achievers ee Aqoonsiga Tayada. DCYF waxaa looga baahan yahay inay ogeysiiso qoysaska haddii bixiyehoodu halis ugu jiro inuu waayo hadaf. Haddii aadan soo gudbin Codsigaaga Early Achievers ee Aqoonsiga Tayada ugu yaraan **30 maalmood ka hor hadafkaaga**, DCYF waxay warqado u diraysaa waalidiinta diiwaangashan ee qaata kaalmada si ay u ogeysiiyaan inaad halis ugu jirto inaad lumiso u qalmitaanka. Haddii aad seegto hadafkan, waxaad dib u heli kartaa u qalmitaankaaga si aad u aqbasho maalgalinta gobolka adiga oo buuxinaya Codsiga Early Achievers ee Aqoonsiga Tayada.



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

April 13, 2022

Early Learning Division | Approved for Distribution by Rachael Brown-Kendall, QRIS Administrator

Shuruudaha Hadafka 3: Buuxi Heerka Tayada ee Loo Baahan Yahay Sida Uu Qabo **Xeerka Dib Loo Egay ee Washington (Revised Code of Washington, RCW) 43.216.135 Iyo RCW 42.216.515.**

- Bixiyeyaasha qaata lacagaha kaalmada ah waa in ay ku dhameeyaan **Heerka Tayada 3 muddo 30 bilood gudahood** laga bilaabo diiwaangelinta Early Achievers.
- Bixiyeyaasha bixiya adeegyada ECEAP waa inay ku dhameeyaan **Heerka Tayada 4 muddo 24 bilood gudahooda** laga bilaabo diiwaangelinta Early Achievers.

Maxaa dhacaya haddii uu iseego hadafkan? Waxaan aqoonsannahay in COVID-19 iyo dib u eegisyada Early Achievers ay ka dhigeen daryeel bixiyeyaal badan inay ku gaari waayaan heerkooda tayada ee looga baahan yahay hadafkooda. Haddii aad soo gudbisay Codsiga Aqoonsiga Tayada (horay loo oran jiray Codsiga Qiimaynta Goobta) oo aad si firfircoon uga qaybgasho waxqabadyada aqoonsiga tayada, markaa waxaad u hoggaansantaa hadadkaaga heerka tayada waxaadna haysan doontaa u qalmitaanka inaad u adeegto adeega kaalmada oo aad bixiso adeegyada ECEAP. Haddii aadan haysan Codsiga shaqaynaya oo Aqoonta Tayada ah ama hadda jira, heerka tayada la dhammeeyey ama haddii Codsigaaga Aqoonsiga Tayada laga noqday, waxaad waayi doontaa u qalmitaankaaga u adeegidda kaalmada ama heshiiskaaga ECEAP lama cusboonaysiin karo. DCYF waxaa looga baahan yahay inay ogeysiiso qoysaska haddii bixiyehoodu halis ugu jiro inuu waayo hadaf. Haddii aadan soo gudbin Codsigaaga Early Achievers ee Aqoonsiga Tayada ugu yaraan **30 maalmood ka hor hadafkaaga**, DCYF waxay warqado u diraysaa waalidiinta diiwaangashan ee qaata kaalmada si ay u ogeysiiyaan inaad halis ugu jirto inaad lumiso u qalmitaanka. Waxaad dib u heli kartaa u qalmitaankaaga si aad u aqbasho kaalmada ama aad bixiso Adeegyada ECEAP adigoo Codsiga cusub oo Aqoonsi Tayo ah ku soo gudbiya gudaha MERIT.

Shuruudaha Hadafka 4: Ilaali Heerka Tayada Hadda Adigoo Cusboonaysiinaya Heerka Tayada Saddexdii Sanaba Mar.

Maxaa dhacaya haddii uu iseego hadafkan? Waxaan aqoonsannahay in COVID-19 iyo dib u eegisyada Early Achievers ay ka dhigeen daryeel bixiyeyaal badan inay ku gaari waayaan heerkooda looga baahan yahay kama dambays taariikhda dhacistaanka. Haddii aad soo gudbisay Codsiga Aqoonsiga Tayada (horay loo oran jiray Codsiga Qiimaynta Goobta) oo aad si firfircoon uga qaybgasho waxqabadyada aqoonsiga tayada, markaa waxaad u hoggaansantaa hadadkaaga heerka tayada waxaadna haysan doontaa u qalmitaanka inaad u adeegto adeega kaalmada oo aad bixiso adeegyada ECEAP. Haddii aadan haysan Codsiga shaqaynaya oo Aqoonta Tayada ah ama hadda jira, Heerka Tayada la dhammeeyey ama haddii Codsigaaga Aqoonsiga Tayada laga noqday, waxaad waayi doontaa u qalmitaankaaga u adeegidda kaalmada ama heshiiskaaga ECEAP lama cusboonaysiin karo. DCYF waxaa looga baahan yahay inay ogeysiiso qoysaska haddii bixiyehoodu halis ugu jiro inuu waayo hadaf. Haddii aadan soo gudbin Codsigaaga Early Achievers ee Aqoonsiga Tayada ugu yaraan **30 maalmood ka hor hadafkaaga**, DCYF waxay warqado u diraysaa waalidiinta diiwaangashan ee qaata kaalmada si ay u ogeysiiyaan inaad halis ugu jirto inaad lumiso u qalmitaanka. Waxaad dib u heli kartaa u qalmitaankaaga si aad u aqbasho kaalmada ama aad bixiso Adeegyada ECEAP adigoo Codsiga cusub oo Aqoonsi Tayo ah ku soo gudbiya gudaha MERIT.

Shuruudaha Hadafka 5: Haddii aad leedahay Heer Tayo Dhamaystiran oo ka hooseeya Heerka Loo baahan yahay, waa inaad dib u soo gudbisaa oo aad ku dhamaystirtaa Heer Tayo 12 Bilood Gudahooda laga bilaabo Taariikhda Hadafkaaga Heerka Tayada ee Ugu Dambeeyay.

Maxaa dhacaya haddii uu iseego hadafkan? Waxaan aqoonsannahay in COVID-19 iyo dib u eegisyada Early Achievers ay ka dhigeen daryeel bixiyeyaal badan inay ku gaari waayaan heerkooda looga baahan yahay kama dambays taariikhda hadafkooda. Haddii aad soo gudbisay Codsiga Aqoonsiga Tayada (horay loo oran jiray Codsiga Qiimaynta Goobta) oo aad si firfircoon uga qaybgasho waxqabadyada aqoonsiga

tayada, markaa waxaad u hoggaansantaa hadadkaaga heerka tayada waxaadna haysan doontaa u qalmitaanka inaad u adeegto adeega kaalmada oo aad bixiso adeegyada ECEAP. Haddii aadan haysan Codsiga shaqaynaya oo Aqoonta Tayada ah ama hadda jira, heerka tayada la dhammeeyey ama haddii Codsigaaga Aqoonsiga Tayada laga noqday, waxaad waayi doontaa u qalmitaankaaga u adeegidda kaalmada ama heshiiskaaga ECEAP lama cusboonaysiin karo. DCYF waxaa looga baahan yahay inay ogeysiiso qoysaska haddii bixiyehoodu halis ugu jiro inuu waayo hadaf. Haddii aadan soo gudbin Codsigaaga Early Achievers ee Aqoonsiga Tayada ugu yaraan **30 maalmood ka hor hadafkaaga**, DCYF waxay warqado u diraysaa waalidiinta diiwaangashan ee qaata kaalmada si ay u ogeysiiyaan inaad halis ugu jirto inaad lumiso u qalmitaanka. Waxaad dib u heli kartaa u qalmitaankaaga si aad u aqbasho kaalmada ama aad bixiso Adeegyada ECEAP adigoo Codsiga cusub oo Aqoonsi Tayo ah ku soo gudbiya gudaha MERIT.